Hagahaaga Dardaaranka Hordhaca ah ee Oregon ee loogu talagalay Daryeelka Caafimaadka

I. HORDHACA:

Hagahani wuxuu kaa caawinayaa inaad buuxiso Dardaaranka Hordhaca ah ee Oregon ee loogu talagalay Daryeelka Caafimaadka. Wuxuu hagahani ka jawaabayaa su'aalo dad badan ay ka qabaan dardaaranka.

Waa maxay ujeedada Dardaaranka Hordhaca ah ee Oregon?

Waa foom sharci ah. Wuxuu kuu oggolaanayaa:

1. Inaad magacawdo qof kuu gaara go'aamada daryeelkaaga caafimaad haddii aadan adigu gaari karin go’aan.
2. Inaad qorto yoolalkaaga iyo waxyaabaha aad rabto ee ku saabsan daryeelka caafimaadka si aad dadka u ogeysiiso. Tani waa haddii ay dhacdo inaadan awoodin inaad mustaqbalka muujiso waxyaabaha aad rabto.

Yaa loogu talagalay Dardaaranka Hordhaca ah ee Oregon?

Waxaa loogu talagalay dadka qaangaarka ah ee gaaray 18 sano jir iyo ka weyn ee ku nool Oregon.

Waa maxay wakiilka daryeelka caafimaadka oo waa maxay doorkiisa?

Waa qofka aad u dooranayso inuu kuu gaara go'aamada daryeelkaaga caafimaad haddii aadan adigu gaari karin go’aan. Wuxuu qofkani go’aan kuu gaarayaa kaliya haddii bixiyeyaasha daryeelka caafimaadku ay go'aamiyaan inaadan awoodin inaad adigu gaarta go'aamada daryeelka caafimaadka.

Shaqada wakiilkaaga daryeelka caafimaadka ayaa ah inuu raaco waxyaabaha aad rabto, qiyamyadaada, iyo yoolalkaaga. Kala hadal wakiilkaaga waxyaabaha aad rabto. Waxaad isticmaali kartaa Dardaarankaaga Hordhaca ah si aad u bilowdo wadahadaladan.

Mid ka mid ah waxyaabaha ugu muhiimsan ee aad sameyn karto ayaa ah inaad doorato wakiilka daryeelka caafimaadka. Sababta aad tani u sameyneyso ayaa ah inaad xaqiijiso in waxyaabaha aad rabto la ixtiraamo. La hadal wakiilkaaga si aad u xaqiijiso inuu ogyahay waxyaabaha aad rabto.

II. BUUXINTA DARDAARANKA HORDHACA AH

Waa maxay qaybaha uu leeyahay Dardaaranka Hordhaca ah ee Oregon?

Wuxuu leeyahay 7 qaybood. Halkan waxaa ah fahfaahino dheeraad ah oo ku saabsan mid kasta:

Qaybta 1-aad: Igu Saabsan Aniga.

Qaybtan ku buuxi macluumaadkaaga xiriirka ee aad haddeer isticmaasho.

Qaybta 2-aad: Wakiil-keyda (adayda) Daryeelka Caafimaadka

Halkani waa meesha aad ku magacaabayso ugu yaraan hal qof oo noqonayo wakiilka daryeelka caafimaadka. Waxaad magacaabi kartaa ilaa saddex qof. Waxay kala yihiin:

- Wakiilka daryeelka caafimaad ee aasaasiga ah
- Beddelka koowaad
- Beddelka labaad

Wakiilka daryeelka caafimaadka ee aad dooranayso ma noqon karo daryeel caafimaad bixiyahaaga ama mulkiilaha, hawlwadeenka, ama shaqaale katirsan xarunta daryeelka caafimaadka ee aad ka hesho daryeelka. Waxaad ORS 127.505 ka eegi kartaa halkan https://www.oregonlegislature.gov/bills_laws/ors/ors127.html si aad u hesho fahfaahino dheeri ah.

Buuxi macluumaadka xiriirka ee uu haddeer isticmaalo qof kasta oo kuu ah wakiil daryeel caafimaad. Waa muhiim in bixiyeyaashaada daryeelka caafimaadka ay awoodaan inay la xiriiraan wakiilka/wakiilada haddii aadan adigu isku hadli karin.

Halkani waxaa ah wax dheeri ah oo ku saabsan wakiilkaaga daryeelka caafimaadka:

- Mid kastaa oo kamid ah wakiilada waa inuu oggolaadaa inuu aqbalo doorkan.
- Mid keliya ayaa markiiba kuu hadli kara. Haddii wakiilkaaga daryeelka caafimaadka ee aasaasiga ahi uusan kuu hadli karin, hawshu waxay u wareegi doontaa beddelka koowaad, ka dibna midka labaad.
- Xaqiiji inay haystaan fasax ay ku arkaan diiwaanadaada caafimaad. Wac xafiiska daryeel caafimaad bixiyahaaga si aad u weydiiso sida arintani loo qabanqaabin kara.

Haddii aadan magacaabin wakiilka daryeelka caafimaadka, sharciga Oregon wuxuu dhigayaa cidda kuu gaari doonta go'aamada haddii aadan adiga awoodin inaad go’aan gaarta. Waxaad ORS 127.635 [2] ka eegi kartaa halkan https://www.oregonlegislature.gov/bills_laws/ors/ors127.html si aad u hesho fahfaahino dheeri ah.

Qaybta 3-aad Tilmaamaha daryeelkayga caafimaadka

Halkani waa meesha aad ku muujin karto waxyaabaha aad rabto, qiyamyadaada, iyo yoolalkaaga ku aadan daryeelkaaga. Waxay qaybtani leedahay su'aalo kaa caawinaya inaad la hadasho wakiilkaaga daryeelka caafimaadka. Waxay sidoo kale wakiilkaaga/wakiiladaada iyo bixiyayaashaada daryeelka caafimaad siinaysaa hagitaan.

Jawaabahaagu waxay bixiyeyaashaada daryeelka caafimaad ka caawin karaan inay soo jeediyaan daryeel ku habboon waxyaabaha aad rabto. Tani waa mid joogto ah xitaa haddii aadan dooran qof kuu noqdo wakiilka daryeelka caafimaad.

Qaybta 3-aad waxaa ku jira su'aalo saddex qaybood ah:

1. **Go'aamada Daryeelkayga Caafimaad.** Dardaaranka Hordhaca ah ee Oregon waxaa ku jira saddex marxaladood oo aad ku muujin karta waxyaabaha aad rabto ee ku saabsan nooca taageerada nolosha ee aad marxalad kasta ka rabto. Kuwani waa:

    1) Haddii aad qabtid cudur aan daawo lahayn oo loo dhinto
    2) Haddii aad qabto jirro waqti kadib ka sii darayso oo fogaatay ama
    3) Haddii aad si joogto ah u miyir daboolan tahay

    Waxaad qeexitaanka kuwani ka eegi kartaa ORS 127.505 iyo ORS 127.635 oo ku laga heli kara barta https://www.oregonlegislature.gov/bills_laws/ors/ors127.html.

    Curyaanimada la mid ma aha qabista jirro waqti kadib ka sii darayso oo fogaatay. Waa inaad doorataa nooca taageerada nolosha ee aad rabto ama aadan rabin. Ama waxaad dooran kartaa in wakiilkaaga daryeelka caafimaadka uu kuu go'aamiyo.

2. **Waxa Aniga iigu Muhiimsan iyo Waxa ii Fiican.** Halkani waa meesha aad ka sheegi karto waxyaabaha kuugu muhiimsan ee ku saabsan noloshaada, iyo waxa qiimo weyn kuu leh. Waxaad sidod kale sheegi kartaa waxa muhiimka kuu ah marka la eego sida laguu daryeelayo. Waxaad sheegi kartaa marxaladaha, haddii ay jiraan, aadan rabi doonin tallaabooyin lagu taageerayo nolosha.
3. **Caqiidooyinkayga Diimeed.** Dadka badankood, dhamaadka noloshu waxay u tahay wakhti ay si weyn u aaminsan yihiin. Halkani waa meesha aad ka sheegi karto caqiidooyinkaaga diimeed. Waxaad sidoo kale sheegi kartaa sida kuwani u saamayn karaan dooqyadaada daryeelka caafimaadka si markaa daryeelka lagu siinayo uu ula jaanqaado waxyaabaha aad aaminsan tahay/caqiidooyinkaaga.

Qaybta 4-aad Macluumaad Dheeri ah

Halkani waa meesha aad ku dari karto macluumaad dheeri ah oo hagayo daryeelkaaga. Tani waxaa ku jira su'aalo ku aadan afar mowduuc:

1. **Nolosha iyo Qiiyamyada.** Isticmaal tani haddii aad rabto in bixiyeyaashaada daryeelka caafimaad iyo wakiilkaaga ay wax dheeri ah ka ogaadaan noloshaada, qiyamyadaada iyo waxyaabaha aad rabto. Waxaad sidoo kale wadaagi kartaa sababta aad u rabto waxyaabaha qaaska kuu ah.
2. **Goobta Daryeelka.** Halkan waa meesha aad ku sheegi karto waxyaabaha aad rabto haddii aad leedahay xulasho ku aadan meesha aad ka heli karto daryeel. Tusaale ahaan, dadka qaarkii waxay si xoogan u rabaan in lagu daryeelo guriga. Qaar kale ayaa laga yaabaa inay rabaan inay joogaan isbitaal.
3. **Wax kale.** Waxaad foomkani ku lifaaqi kartaa dukumiintiyo gacan ka geysanayo hagista daryeel bixiyayaashaada iyo wakiilkaaga. Kuwani waxay noqon karaan:
    - Dukumiintiyo aad qortay oo muujinaya qiyamyadaada
    - Macluumaad ku saabsan noocyada daryeelka ee aad hadda hesho. Tani waxay muhiim u noqon kartaa dadka naafada ah ama kuwa qaba xaaladaha caafimaad/cudurada raaga
    - Wixii ah macluumaad kale oo aad rabto in aad wadaagto
4. **Ogeysii Dadka Kale.** Halkani waa meesha aad ku qori karto dadka ay wakiilkaaga daryeelka caafimaadka iyo bixiyeyaashaada daryeelka caafimaad kala hadli karaan xaaladaada caafimaad iyo daryeelkaaga. Dadkani looma ogola inay wax go'aano ah ka gaaraan daryeelkaaga. Kaliya wakiilkaaga daryeelka caafimaadka ayaa go’aan gaari kara.

Qaybta 5-aad, 6-aad, iyo 7-aad.

Qaybta 5-aad waa meesha aad ku saxiixayso foomka.

Qaybta 6-aad, *waa*

- In laba markhaati oo qaangaar ah saxiixaan foomka. Qofka markhaatiga ah ma noqon kara wakiilkaaga daryeelka caafimaadka ama daryeel caafimaad bixiyahaaga. Ama
- In markhaatiga dowlada u shaqeeya saxiixa foomka.

Qaybta 7-aad, wakiiladaada daryeelka caafimaadka waa inay aqbalaan doorka. Waxay aqbalida ku muujin karaan inay saxiixaan foomkan ama inay qof u sheegaan inay aqbalayaan waajibaadyada ah inay yihiin wakiiladaada daryeelka caafimaadka.

Ka warran haddii aanan buuxin dhammaan qaybaha?

Aad bay u fiican tahay inaad buuxiso dhammaan qaybaha foomka. Hase yeeshee, waxaad dooran kartaa inaad buuxiso kaliya qaar qaas ah.

Kuwani waa waxa aad u baahan tahay inaad sameyso si aad u xaqiijiso in Dardaaranka Hordhaca ah ee Oregon uu yahay mid la oggol yahay oo ansax ah:

Si uu u noqdo mid ansax ah:	**Waa tee qaybtaas?**
Waa inay qorayso magacaaga, taariikhda dhalashadaada, cinwaankaaga iyo macluumaadka kale ee xiriirka.	Qaybta 1-aad
Waa inay qorayso magaca, ciwaanka iyo macluumaadka kale ee xiriirka ee qof kasta oo ah wakiilka daryeelka caafimaadka.	Qaybta 2-aad
Waa inaad saxiixdaa oo aad taariikhda ku qortaa.	Qaybta 5-aad
Foomka waa inay saxiixaan laba markhaati AMA waa inuu saxiixa markhaatiga dowlada u shaqeeya.	Qaybta 6-aad
Mid kasta oo ka mid ah wakiilada daryeelka caafimaadka waa inuu aqbalo doorka. Waxay aqbalida ku muujin karaan inay saxiixaan foomkan ama inay qof u sheegaan inay aqbalayaan doorka iyo waajibaadyada ah inay yihiin wakiiladaada daryeelka caafimaadka.	Qaybta 7-aad

Qasab ma aha inaad buuxiso qaybta 3-aad iyo qaybta 4-aad si dardaarankaga hordhaca ah u noqdo mid ansax ah. Laakin buuxinta qaybahan waxay bixiyeyaashaada daryeelka caafimaadka siin kartaa hagitaan ku saabsan daryeelka aad rabto inaad hesho. Tani waa mid joogto ah xitaa haddii aadan dooran qof kuu noqdo wakiilka daryeelka caafimaad.

III. MACLUUMAAD DHEERI AH

Ka warran haddii aan naafo ahay?

Haddii aad naafo tahay, halkan waxaa ah tallaabooyin dheeri ah oo aad qaadi karto markaad buuxinayso foomka:

- Waxaa laga yaabaa inaad rabto inaad la tashato dadka la shaqeeya dadka naafada ah. Kuwani waxaa ku jira, laakiin kuma xadidno:
  - Dadka aad isku faca tihiin iyo dadka khibrada u leh noolasha
  - Daryeel caafimaad bixiyeyaasha la aamini karo
  - Khubarada sharciga
- Haddii aad ku nooshahay goob daryeel, waxaad caawimaad weydiisan kartaa wakiilka sharci.
- Waxaa sidoo kale laga yaabaa inaad rabto inaad ku darto macluumaad ku saabsan daryeele ama masuul hadda kaa caawiya go'aamada daryeelka caafimaadka.
- Wadaag kaalmada ama qabanqaabada aad ugu baahan karto nolol maalmeedka.
- Qaybta 3-aad waxa ku jira boos aad ku qori karta wax dheeri ah oo ku saabsan nooca daryeelka aad rabto ama aadan rabin. Waxaad ku dari kartaa noocyada daryeelka taageero ee aad hore usii haysato.

Waa maxay faraqa u dhexeeya Dardaaranka Hordhaca ah ee Oregon iyo POLST?

Dardaaranka Hordhaca ah iyo POLST (Amarrada La Qaadan karo ee loogu talagalay Daaweynta Taageerada Nolosha) way kala duwan yihiin. Dardaaranka Hordhaca ah ee Oregon waa foom sharci ah oo lagu muujinayo waxyaabaha aad rabto laguna magacaabayo qof kuu gaarayo go'aamada daryeelka caafimaadka. Oregon POLST waa amar caafimaad oo sheegaya qorshahaaga daryeelka caafimaadka iyo daawaynta lagu siin doono.

Hase ahaatee, way fududahay in la isku qaldo labadan. Shaxdani ayaa muujinaysa farqiyada udhaxeeya.

	Dardaaranka Hordhaca ah	**POLST** (waxay u taagan tahay Portable Order for Life Sustaining Treatment)
Yaa loogu talagalay?	Dhammaan dadka ah 18 sano jir iyo ka weyn.	Dadka qaba cudurada halista ah ama kuwa da' weyn ee tabarta daran oo laga yaabo in aysan rabin dhammaan daawaynta.
Waa dokumiinti noocee ah?	Waa dukumiinti sharci ah.	Waa amar caafimaad.
Yaa saxiixaya?	Adiga ayaa buuxinaysa oo saxiixayso. Markhaati Dowlada u shaqeeya ama laba markhaati ayaa saxiixaya. Sidoo kale, wakiilkaaga daryeelka caafimaadka ayaa saxiixaya.	Bixiyahaaga daryeelka caafimaadka ayaa buuxinaya isagoo kula tashanayo. Kadibna wuu saxiixayaa.
Miyaan u baahanahay qareen?	Maya.	Maya.
Yaa haynaya foomka?	Waxaad foomka asalka ah dhigaysaa meel ay ehelkaaga ka heli karaan. Waxaad nuqul kamid ah foomka siineysaa wakiilkaaga daryeelka caafimaadka iyo daryeel caafimaad bixiyahaaga.	Xafiiska daryeel caafimaad bixiyahaaga ayaa haynaya waxayna galinayaan diwanka elektirooniga ah ee POLST ee Oregon. Waxay ku siinayaan nuqul. Waxaad guriga uga dhejin kartaa meel ay fududahay in laga arko, sida talaajadda korkeeda.
Ma bedeli karaa foomka haddii aan beddelo go’aankeyga?	Haa. Waad jeex-jeexi kartaa midkii hore. Kadibna qor mid cusub oo dhig meel ay ehelkaaga ka arki karaan. Waxaad nuqul kamid ah foomka siineysaa wakiilkaaga daryeelka caafimaadka iyo daryeel caafimaad bixiyahaaga.	Haa. Waxaad codsan kartaa ballan aad la yeelanayso daryeel caafimaad bixiyahaaga si aad u bedesho.
Ka waran haddii ay jirto xaalad caafimaad oo degdeg ah oo aanan isku hadli karin?	Wakiilkaaga daryeelka caafimaadka ayaa ku hadlayo wuxuuna raacayaa waxyaabaha aad rabto.	Shaqaalaha ambalaasta, shaqaalaha isbitaalka iyo bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka waxay keydka xogta ee elektirooniga ah ka raadiyaan amarada caafimaadka waxayna raacaan amaradaas.

laga soo xigtay © The Next Door, Inc. 2019

Dadku miyay yeelan karaan Dardaaran Hordhaca ah *iyo* POLST?

Haa. Marka ay dadku sii xanuunsadaan ama sii daciifaan, waxay badanaa leeyihiin labadaba. Dardaaranka Hordhaca ah ee Oregon waa foom lagu caddeeyo waxyaabaha aad rabto. POLST waa amar caafimaad oo waxyaabaha aad rabto u beddela ficil.

Waxaad daryeel caafimaad bixiyahaaga kala hadli kartaa daawaynta aad rabto iyo mida aadan rabin. Haddii ay kugu habboon tahay, waxay kuu buuxin karaan oo ay kuu saxiixi karaan POLST.

Xitaa haddii aad leedahay POLST, waxaad weli u baahan tahay Dardaaran Hordhaca ah. Sidaa darteed, xaqiiji inaad ku darto waxyaabihii ugu dambeeyay. Dib u-eeg. Xaqiiji inay ka tarjumayso dooqyadaada POLST.

Wixii ah macluumaad dheeri ah oo ku saabsan POLST, booqo Oregonpolst.org. Waxaad sidoo kale su'aalo ku soo diri kartaa polst@ohsu.edu.

Waqti intee le’eg kadib ayaan dib u-eegis ku sameeyaa Dardaarankayga Hordhaca ah?

Aragtidaada/fikradahaaga ayaa laga yaabaa inay isbeddelaan muddo ka dib. Haddii yoolalkaaga iyo waxyaabaha aad rabto ay isbeddelaan, buuxi foom cusub.

Dib u-eeg oo ka fikar inaad cusboonaysiiso Dardaarankaaga Hordhaca ah mar kasta oo mid kamid ah "Lixda **D**” ay dhacaan:

- **D**ecade Marka aad bilowayso toban sano oo noloshaada ku cusub.
- **D**eath Marka qof ehelkaaga ama wakiilka daryeelka caafimaadku dhinto.
- **D**isagreement Marka wakiilkaaga daryeelka caafimaadka uusan kugu waafaqsaneyn waxyaabaha aad rabto.
- **D**ivorce Marka furiin yimaado.
    - Haddii xaaskaagii hore ama lammaanahaagii hore uu yahay wakiilkaaga, Dardaarankaaga Hordhaca ansax ma aha wixii intaa ka dambeeyo.
    - Waxaad u baahan tahay inaad buuxiso Dardaaran Hordhac ah oo cusub. Xeerku waa sidan xitaa haddii aad rabto in xaaskaagii hore ama lammaanahaagii hore uu sii ahaado wakiilkaaga
- **D**iagnosis Marka lagugu sheego jirro halis ah.
- **D**ecline Marka caafimaadkaagu sii xumaado ama marka aadan awoodin inaad keligaa noolaato.

Maxaan sameeynayaa haddii aan buuxiyo Dardaaranka Hordhaca ah oo cusub?

Haddii aad buuxiso foom cusub, u sheeg dadkan. Sidoo kale, sii nuqul cusub.

- Wakiiladaada daryeelka caafimaadka
- Daryeel caafimaad bixiyayaashaada
- Qof kastoo kale ee haysta nuqulka Dardaarankaaga Hordhaca ah

Maxaan sameeynayaa haddii aan buuxiyo Dardaarankayga Hordhaca ah?

1. Wakiilkaaga daryeelka caafimaadka kala hadal yoolalkaaga iyo waxyaabaha aad rabto ee ku aadan daryeelka caafimaadka mustaqbalka. Xaqiiji inay dareemayaan inay kuu qaban karaan shaqadan muhiimka ah. Sii nuqulka Dardaarankaga Hordaca ah.
2. La hadal qoyskaaga iyo saaxiibadaada kuu dhow ee laga yaabo inay ku lug leeyihiin xaaladaada haddii aad qabto jirro ama dhaawac halis ah. Xaqiiji inay ogyihiin:
   - Qofka ah wakiilkaaga daryeelka caafimaadka
   - Waxa ay yihiin waxyaabaha aad rabto
3. Nuqul sii daryeel caafimaad bixiyahaaga. Xaqiiji inuu ogyahay waxa ay yihiin waxyaabaha aad rabto.
4. Nuqul kamid ah Dardaarankaaga Hordhaca ah dhig meel si fudud looga arki kara, sida talaajadda oo kale.
5. Buuxi kaarka ku dhegan qaybta hoose ee Hagahan. Ku rid boorsadaada jeebka.

Ka waran haddii aan rabo in la iga caawiyo buuxinta Dardaaranka Hordhaca ah?

Haddii aad rabto in lagaa caawiyo buuxinta Dardaaranka Hordhaca ah, waxaad la xiriiri kartaa:

- Daryeel caafimaad bixiyayaashaada
- Qareen
- Wakiilka sharciga ah ama u-doodayaasha kale ee bukaanka.

Buuxi kaarka hoose. Isku laabi oo ku rid boorsadaada jeebka.

Waxaan leeyahay Dardaaranka Hordhaca ah **Macluumaadkeyga** Magacayga: Taariikhda:	**Wakiilkayga Daryeelka Caafimaadka:** Magaca: Ciwaanka: Magaalada/Gobolka/Baaqa Boostada/Zip-ka:

Cinwaankeyga: Magaalada, Gobolka, Zip-ka: Taleefonka: Taariikhda Dhalashada: Iimaylka:	Taleefan-ka (nada) Iimaylka: * Wakiilada daryeelka caafimaadka ee beddelka ah ku qor dhinaca ka soo horjeeda.

Helitaanka dukumiintiga: Shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale oo dadban sida fasiraadaha, daabicida farta waaweyn, ama farta indhoolayaasha. Kala xiriir Xarunta Macluumaadka Caafimaadka 1-971-673-2411, 711 TTY ama COVID19.LanguageAccess@dhsoha.state.or.us.

Hagahan Isticmaalaha waxa soo saaray Guddida Yeelashada Dardaaranka Hordhaca ah iyada oo laga jawaabayo Xeerka Dardaaranka Hordhaca ah.